




Amarka Sargaalka Caafimaadka Maxaliga ee Deegaanka King

Kulamada ballaaran ee dadweynaha, goobaha ciyaaraha ee gudaha, meelaha jimicsiga, makhaayadaha, iyo baararka waa inay ku waajibiyaan macaamiisha inay tusaan caddeyn tallaal ama baaritaan cudurka laga helin.

Sabteembar 16, 2021



Laga bilaabo 25'ta Oktoobar:

Macaamiisha waxaa lagu waajibin doonaa inay tusaan caddeyn tallaalka COVID-19 ama baaritaan cudurka aan laga helin si ay u galaan:

- **Dhacdooyinka bannaanka (Kulamada)** ee wata 500 oo qof ama ka badan (oo ay ku jiraan dhacdooyinka xirfadleyda, ciyaaraha jaamacadaha iyo madadaalada)
- **Dhacdooyinka (kulamada) ama goobaha ciyaaraha ee gudaha** (oo ay ku jiraan ciyaaraha xirfadleyda, madadaalada, riwaayadaha, shaleemooyinka, miyuusiga tooskaa, meelaha jimicsiga iyo shirarka)
- **Makhaayadaha iyo baararka** (oo ay ku jiraan cunto-cunista gudaha). Tan ma quseyso cunto-cunista bannaanka, macaamiisha cuntada qaata, iyo meelaha inta badan aan loo isticmaalin makhaayad ahaan sida dukaamada cuntada.

Tan ma quseyso caruurta ka yar 12

Laga bilaabo 6'da Dhiseembar:

Macaamiisha waxaa lagu waajibin doonaa inay tusaan caddeyn tallaalka COVID-19 ama baaritaan cudurka laga helin si ay u galaan:

- Makhaayadaha iyo baararka leh awood 12 kursi ama wax ka yar



Maxaa loo aqoonsadaa caddeyn tallaal?

- Kaadh tallaal ama sawir kaadh tallaal ee CDC
- Qoraal ka yimid diiwaan caafimaad/tallaal-bixiye
- Caddeyn tallaal oo ka timid gobol ama wadan kale
- Barnaamijka foonka-gacanta (mobile apps) ee dhaqaatiirta daryeelka caafimaadka (oo ay ansixisay Wasaaradda Caafimaadka ee WA)
- Shahaado daabacan ama Koodh QR ah (diyaar ah dhamaadka Sabteembar) ee laga helo MyIRMobile.com

Uma baahnid inaad tusto aqoonsi la socda caddeynta tallaalka.

Waa maxay MyIR Mobile?

MyIR Mobile waa bar khadka internetka ku jirta oo dadka siisa marin ay ku helaan diiwaannadooda tallaalka ee gobolka oo rasmi ah. Waxaa kawnto (account) ka furan kartaa

www.MyIRMobile.com

MyIR Mobile wuxuu hadda ku koobanyahay afka Ingiriiska oo keliya. Caawimaad luuqadeed, ama caawin dheeraada ee helidda diiwaannadaada, ka wac Khadka Caawinta Tallaalka Gobolka Washington (833) 829-4357 ama iimeel u dir waisrecords@doh.wa.gov

**Haddii aadan tallaalneyn ama aadan caddeyn
karin xaaladda tallaalka, markaas waa in aad
tustid caddeyn baaritaan PCR COVID-19 ah oo
lagaa waayay feyraska ee 72 saac ee la soo
dhaafay gudahooda, ama natiijo baaritaan
dhaqso ah oo feyraska lagaa waayay oo ka timid
cudur-baare ku sameeyay goobta dhacdada ama
meesha waxyar kahor gelitaanka.**



Macluumaad dheeraada, booqo
kingcounty.gov/verify

Public Health
Seattle & King County

